Ogow Kansarka Naasaha Goor Hore.
Qabso Ballantaada Raajada Naasaha Maanta.

Sida La Iskaga
Hubiyo Kansarka Naasahar

Samaynta Raajada Naasaha

Raajada Naasha waa baadhis aad waxtar u leh oo lagu baadho kansarka naasaha. Raajada Naasaha waa raajada naaska taas oo ka heli karta isbeddellada aan caadiga ahayn ee ku dhaca naaska, xitaa marka ay aad u yar yihiin ee aan la dareemi karin ama aan la arki karin.

Uqalmidda

40-74 sanno

Inta badan dadka da'doodu u dhaxayso 40 - 74 sano ee uqalma waa inay maraan raajada naasaha labadii sannaba mar. Shakhsiyaadka ayaa iskood u tegi kara. Qofkasta oo leh taariikh qoys oo kansar ah ayaa uqalmi kara si dhakhso ah.

La hadal bixiye caafimaad haddii aad qabto su'aalo ku saabsan ikhtiyaarrada baarista.

Sida loo qabsado ballan

Wac goobta aad ku martay raajadaadii naaska ee u dambaysay, lambarka bilaashka ah ee Barnaamijka Baarista Kansarka Naaska orthe Ontaariyo 1-800-668-9304.